CARE INTERNATIONAL- SOOMAALIYA/SOMALILAND

Difaacidda Sharaf iyo Karaamo.
La-dagaalanka Saboolnimada.

Kaarka Tixraaca Degdegga Ah: Habraacyada iyo Siyaasadaha Shaqaalaha:

JANNAAYO 2018

HORDHACA IYO BAAXADDA

Kani wuxuu si cad u soo koobayaa habraacyada iyo siyaasadaha shaqaalaha muhiimka ah ee lagu dabakhi karo shaqaalaha Gobolka iyo Qaranka ee CARE Soomaaliya / Somaliland. Kaarkani Tixraaca Degdegga ah waa caawiye heer-sare ah kaas oo ku wargelinaya kuna hagaya shaqaalaha waxa CARE International ay ka filanayso shaqaalaha iyo waxa shaqaaluhu ay ka filan karaan CARE. Kaarkani waa in had iyo jeer lala akhriyo Buugga Habraacyada iyo Siyaasadda ee Shaqaalaha: http://som.ecsagateway.org/iyo qandaraaska shaqada ee shaqaalaha haddii loo baahdo faahfaahin buuxda. Waxyaabaha uu ka kooban yahay buuggan xogta gaarka ah bixiya waxaa lagu khasban yahay in la beddelo mararka qaar, waxaanna sida ugu habboon loogu soo wargelin doonaa shaqaalaha.

Qaybaha muhiimka ah

- Siyaasadaha ugu muhiimsan shaqaalaha oo si cad u kooban.
- Guudmarka xaaladaha muhiimka ah.

HIIGSIGA, HIMILADA IYO QIYAMKA CARE

Hiigsigeenna

CARE waxay ka shaqeysaa adduunka oo dhan si ay u badbaadiso nafaf, uga guulaysato saboolnimada oo ay u gaarsiiso cadaalad bulsho.

Himiladeenna

Waxaan baadigoobaynaa adduun leh rajo, dulqaad iyo cadaalad bulsho, saboolnimo laga adkaaday oo dadka oo dhan ay ku nool yihiin si karaamo iyo nabadgelyo leh.

Waxyaabaha Aynu Diirrada Saarno

Waxaannu diirrada saarnaa haweenka iyo gabdhaha sababtoo ah waxaannu ognahay in aannu ka adkaan karin saboolnimada ilaa ay dadka oo dhan ka helaan xuquuqda fursado ay u siman yihiin.

Qiyamkeenna

Dhalanrogmasho
Daacadnimo
Kala-duwanaan
Heer-sare
Sinnaan

XIRMADA SIYAASADAHA EE CARE

"Xirmadan siyaasadaha" waxaa la diyaariyay iyadoo ujeeddadu tahay in lagu hago shaqaalaha CARE Soomaaliya/Somaliland in ay ilaaliyaan hab-dhaqanka habboon inta ay ku guda jiraan shaqadooda, ee waafaqsan qiyamka iyo mabaadii'da hay'adda. Waxaa ka mid ah Xeerka Hab-dhaqanka, Siyaasadda Carruurta iyo Siyaasadda Ka Dhanka ah Xadgudubka iyo Ka-faa'iideysiga Galmo (PSEA). Sida qayb ka tirsan CARE ahaan, waxaa lagaa doonayaa in aad saxiixdo qaraar ama

hadal cad si aad ugu hoggaansanto siyaasadahan oo aad ku muujinayso in ay kaa go'an tahay in aad u hoggaansameyso waajibaadka, mas'uuliyadaha iyo qiyamka ku qoran halkan.

A. SHAQO-QORISTA IYO XULASHADA

Kala-duwanaanta/ Fursado Loo Siman Yahay

CARE Soomaaliya/Somaliland waxay taageeraysaa siyaasadda bixinta fursado shaqo oo loo siman yahay oo aan takoor lahayn, iyadoo aan la eegayn isirka, midabka, diinta, jinsiyadda, qabiilka, jufada, jinsiga ama da'da qofka. CARE waxaa sidoo kale ka go'an in ay ka dhigto qayb ka mid ah hab maamulka hay'adeed xaqsoorka jinsiga iyo kala duwanaanta ee heerarka barnaamij iyo kuwa hay'adeed. Si taasi loo gaaro, hannaanka shaqo-qorista wuxuu ku dadaali doonaa in uu fursado siiyo musharaxiinta oo dhan si loogu dheellitiro musharaxiinta dheddiga (dumarka) ah.

Kala-soocidda Shaqooyinka

Jagooyinka shaqaalaha oo dhan waxaa loo qeexi doonaa si waafaqsan Darajeynta Shaqooyinka iyo Heerka mushaarka. Darajo kasta ee qaab-dhismeedka gudahiisa ah waxay ka turjumaysaa mushaharka ugu badan ama ugu yar. Mushaharka shakhsi kasta waa in lagu saleeyo darajeynta shaqooyinta iyo qaab-dhismeedka mushaharka.

Hubinta Tixraaca

Shaqaalaynta musharax kasta waxay ku xiran tahay hay'adda in ay ka hesho tixraacyo xirfadeed oo lagu qanci karo ugu yaraan laba qof oo mas'uul ah. Waxaa la doorbidayaa in midkood laga helo cidda uu musharaxa hadda u shaqeeyo ama hore ugu soo shaqeeyay.

La-dagaalanka Argagaxisada

CARE waa in ay u hoggaansanto dhammaan sharciyada iyo xeer-nidaamiyayaasha wax-ka-qabanaya argagaxisinimada iyo hawlaha argagaxisada. Dhammaan shaqaalaha waxaa laga eegi doonaa habka liisto-hubineedka la-dagaalanka argagaxisada ee CARE, ka hor inta aan la shaqaalayn.

Hannuuninta Xil-la-wareegida

Waxaa lagu siin doonaa hannuunin ku saabsan xil-la-wareegidda/jago qabashada marka aad bilowdo shaqadaada si ay kuugu suurtagasho in aad la qabsato doorkaaga cusub iyo jawiga shaqada. Hannuuninta xil-la-wareegida waxay shaqaale ahaan kuu saamaxaysaa in aad fahanto xuquuqahaaga iyo mas'uuliyadahaaga iyo qiyamka hay'adda. Waxaa intaa dheer, in ay kugu caawin doonto fahanka waxyaabaha muhiimka ah ee shaqada lagaaga baahan yahay, bixinta macluumaad ku saabsan sida loo helo qalabka iyo khayraadka loogu baahan yahay doorkaaga waxayna gacan ka geysan doontaa in aad xiriiro la yeelato shaqaalaha kale. Waxaad sidoo kale ka heli doontaa hannuunin gaar ku ah shaqada kormeerahaaga si aad si wanaagsan ugu fahanto waxa lagaa filayo.

Tijaabada

Marka la shaqaaleeyo, shaqaalaha waa in uu si guul ku dhammaata u dhammeysto muddo tijaabo ah ka hor inta aan la xaqiijin shaqaalayntiisa. Waa mas'uuliyadda kormeeraha in uu xaqiijiyo qiimaynta tijaabada in wakhtigeeda la qabto iyo in xaqiijinta aan dib loo dhigin.

Dhammaan qandaraasyada daba furan iyo qandaraas kasta oo laba iyo toban (12) bilood ah ama ka badan waxaa uu leeyahay seddax-bilood oo muddo tijaabo ah oo ay suurtagal tahay in lagu kordhiyo saddex bilood iyadoo ku xiran wax-qabadka. Qandaraas kasta oo ka yar 12 bilood wuxuu leeyahay muddo laba-bilood oo tijaabo ah iyadoo ay suurtagal tahay in lagu kordhiyo laba bilood kale. Qandaraas kasta oo ka yar saddex bilood wuxuu yeelan doonaa laba (2) toddobaad oo muddo tijaabo ah iyadoo ay suurtagal tahay in lagu kordhiyo laba toddobaad oo kale.

Saacadaha Shaqada

Shaqaalaha fadhigoodu yahay Nayroobi

Saacadaha shaqada ee caadiga ah waa 8:00 a.m. (subaxnimo) ilaa 4.45 p.m. (fiidnimo) laga bilaabo Isniin ilaa Khamiis iyo 8.00 a.m. (subaxnimo) ilaa 3.00 p.m. maalmaha (fiidnimo) Jimcaha oo leh nasasho qado laga bilaabo 13.00 saac ilaa 14.00 saac.

Shaqaalaha fadhigoodu yahay Soomaaliya/Somaliland

Saacadaha shaqada caadiga ah waa 8.00 a.m. (subaxnimo) ilaa 4.30 p.m. (fiidnimo) laga bilaabo Axad ilaa Khamiis, oo leh nasasho qado.

Habka wakhtiga shaqada ay shaqaaluhu doortaan

Siyaasaddan waxay sharxaysaa xaq-u-yeelashada shaqaalaha in ay isticmaalaan hab wakhtiga shaqada ay shaqaaluhu doortaan. Nidaamka habka wakhtiga shaqada ay shaqaaluhu doortaan waxaa loogu talogalay in uu u saamaxo shaqaalaha CARE Soomaaliyaa/Somaliland in ay shaqeeyaan wakhtiyo hore loo qorsheeyay oo ku habboon duruufahooda shakhsi iyadoo la hubinayo in la ilaaliyo jaangooyooyinka.

Saacadaha shaqada ay shaqaaluhu doortaan ee la oggolaaday ee xafiiska dalka waa:

Wakhtiga ugu horeeya ee bilowga:	7.00 am
Wakhtiga ugu dambeeya ee bilowga:	9.00 am
Wakhtiga ugu horeeya ee dhammaadka:	3.45 pm
Wakhtiga ugu dambeeya ee dhamma:	5.45 pm

Wakhtiga dheeraadka ah (OT)

Shaqaalaha waxaa laga codsan karaa in ay wakhti dheeraad ah shaqeeyaan marmar si loo hubiyo in wakhtiyada kama dambeyska ah laga soo baxo.

Wakhtiga dheeraadka ah ee la shaqeeyo maalinta shaqada caadiga ah, maalinta nasashada shaqaalaha ama maalin fasax dadweynaha ah oo jaraa'idka lagu soo qoray shaqaalaha waa in uu xaq u yeesho wakhti fasax ah beddelkaasi oo u dhigma wakhtiga dheeraadka ah ee uu shaqeeyay. Saacadaha dheeraadka ah ee la shaqeeya, wakhti fasax ah oo u dhigma ayaa beddelkooda la siin doonaa shaqaalaha. Wakhtiga fasaxa ah, waa in ay hore isugu raacaan Maareeyaha sida tooska ah u maamulo shaqaalaha wakhtigana waa in la qaato afar (4) toddobaad gudahooda, ka-dib marka wakhtiga dheeraadka ah la shaqeeyo.

Shaqaalaha socdaalaya / ay tahay in uu socdaal ku tago xafiisyada ka baxsan goobtooda shaqada maalinta fasaxa ee toddobaadka ama fasaxa dadweynaha waa in uu xaq u yeesho maalin fasax ah oo beddelkeedu qaadan karo maalintaas fasaxa toddobaadka ama maalinta fasaxa dadweynaha. Tani sidoo kale waxaa loo adeegsan karaa shaqaalaha fadhigiisu yahay Soomaaliya/Somaliland iyo sidoo kale kuwa Nayroobi.

Shaqaalaha xaqa u leh fasaxa R&R xaq uma laha magdhowga maalmaha fasaxa toddobaadka ama maalmaha fasaxa dadweynaha ee la shaqeeyay maadaama tani lagu soo darey R&R-kooda.

Warbixinta Hawlaha Hawlwadeenka (PAR)

Bil kasta DHAMMAAN shaqaalaha waxaa laga doonayaa in ay ku diyaariyaan PAR-ka gudaha HRMIS. PAR-ka waxay muujinaysaa qeybinta wakhtigooda ama wakhtiga lagu qaatay hawlaha kala duwan ee la xiriira shaqadooda. PAR-ka waa in uu ansixiyo shaqaale kasta kormeerahiisa. Taariikhda soo gudbinta ee PAR-ka waa maalinta shaqada ugu horreysa ee bisha soo socota.

B. SIYAASADDA DALACSIINTA

Dhammaaan soo-jeedimada dalacsiinta ee Shaqaalaha qabanaya jago heer-sare ah waxaa loo mari doonaa hannaanka qiimaynta wax-qabadka sannadlaha. Maareeyaha tooska ah ee maamula shaqaalaha ayaa sameyn doona talo-soojeedinta isagoo soo marsiinaya foomka dib-u-eegidda wax-qabadka, kaas oo ay sii eegi doonaan ka-dibna ay ansixin doonaan koox Maamulka Sare ah. Dalacsiinta waxay ku lug yeelan kartaa shaqaalaha in loo beddelo jago kale, waax ama goob shaqo kale waxaana u qoondeyn doona Xafiiska Shaqaalaha darajada ku habboon iyadoo lagu saleynayo mas'uuliyadaha shaqo ee sii kordhaya ee lagu muujiyay Sharaxaadda. Marka laga reebo soo-jeedinta dalacsiinta ee loo maro hannaanka maamulka Wax-qabadka, fursado ayaa ka dhalan kara bilowga mashaariic cusub. Xaaladdan hannaan shaqo-qoris lagu tartamo ayaa la sameyn doonaa.

C. SIYAASADDA BEDDELAADDA / DIB UGU MAGACAABIDDA HAWL

Waajibaadka koowaad ee aasaasiga ah ee CARE waa in ay keento qofka ugu aqoonta/xaqa leh iyo fulinta hawlaha kala duwan ee degaanka hawlgalka Xafiiska Dalka. Shaqaalaha waxaa la beddeli karaa iyagoo laga beddelaya hal mashruuc / waax / goob loona beddelayo meelo kale haddii loo baahdana gudaha degaanka hawlgalka ee xafiiska dalka. Iyadoo xaaladaha oo dhan si adag loogu tixgelin doono fikradaha shaqaalaha, CARE waxay xaq u leedahay in ay beddesho ama isku wareejiso shaqaalaha oo ku xiran shuruudaha iyo baahida hay'adda.

Beddelaadda shaqaalaha ee laga soo beddelo hal gobol (Nayroobi, Puntland, Somaliland, Koonfurta iyo Gobollada Dhexe) ee loo beddela gobol kale waxaa saameyn doona beddelaadda shuruudaha canshuurta sababtan awgeedna lacagaha mahadcelinta ee isku soo ururay, gunnooyinka iyo halka lagu adeegsan karo lacagaha hawlgabka shaqaalahaas waxaa la siin doonaa shaqaalaha waxaanna laga tirtiri doonaa xaanshida lagu qoro xisaabaha isku soo urura, marka loo beddelo gobol kale. Wax la mid ah ayaa lagu adeegsan doonaa xaaladaha shaqaalaha laga beddelo dabaqadda heer shaqaale qaran ama gobol loona beddelo dabaqadda heer shaqaale caalami ah.

Ogow: lacag-bixinta dheefaha kor ku xusan lama sameyn doono marka beddelaaddu ay tahay gobol gudahiisa/mid u dhaxeysa laba xafiis oo ku yaalla isla hal gobol.

Xaq-u-yeelasho

Shaqaalaha, ee ay uga baahan tahay CARE in uu u guuro meel ka baxsan magaaladii uu hore u joogay/ay u joogtey iyadoo sabab u ah in shaqada loo wareejiyay halkaas, waxaa uu xaq u yeelan doonaa gunnada kharashaadka guuritaanka oo la mid ah 50% ee mushaharka aasaasiga ah ee hal bil. Haddii loo guurayo guryaha martida ee CARE shaqaalaha xaq uma yeelan doono gunnadan.

D. FASAX

Dhammaan noocyada/qaababka fasaxa waxaa loo maamuli doonaa si ku saleysan sannad kalandaariyaha (1da Jannaayo ilaa 31ka Diseembar). Shaqaalaha ku soo biirra CARE sannadka nuskiisa, fasaxa bukaanka waxaa looga soo bilaabayaa xisaabtiisa taariikhda uu ku soo biirray ilaa dhammaadka sannad kalandaariyaha.

Fasax Sannadeed

Waxaa jira koror sii-kordha oo ku yimaada xaq-u-yeelashada fasaxa sannadlaha ee shaqaalaha iyadoo ku xiran tirada sannadada adeegga. Qiyaasta heer-heerka loo kala qaybiyay waxaa lagu muujiyay xagga hoos (dhaqangal ah Luulyo 2013), kuwan waxaa gelin doona koontooyinka HRMIS ee shaqaalaha saraakiisha waaxda shaqaalaha.

- 0-5 sano - 25 maalmo shaqo/sannadkii – 2.08 /bishii
- >5-10 sano - 28 maalmo shaqo/sannadkii – 2.33 / bishii
- <10 sano - 30 maalmo shaqo/sannadkii – 2.50 / bishii

Shaqaalaha xaqa u leh dheefta R & R waxay keliya xaq u yeelan doonaan fasaxa sannadlaha oo 15 maalmood ah (1.25 maalmood bishiiba).

Fasax Sannadeedka Loo Wareejiyo Sannad Kale

CARE waxay ogsoon tahay in wakhtiga laga maqan yahay shaqada uu yahay qayb muhiim ah oo ka mid ah isku-dheelitiridda shaqada-nolosha, waxayna ku dhiirrigelinaysaa shaqaalaha oo dhan in ay qaataan dhammaan maalmaha u urura sannad kasta. Hase-yeeshee, waxaa jiri kara wakhtiyo aadan awoodin in aad sidaa sameysid, sidaa awgeed CARE waxay ku siinaysaa awood aad ugu wareejinayso ugu badnaan 10 maalmood oo fasaxa sannadlaha ah ee hal sano kalandaariya ilaa sannadka xiga. Maalmo kastoo urura ee ka badan xaddigan ciqaab ahaan ayaa lagu lumin doonaa

dhammaadka sannad kalandaariye kasta haddii laga helo ka-reebnaan/oggolaansho Agaasimaha Dalka mooyaane.

Lacag u beddelidda fasaxa (*Leave encashment*)

Keliya marka uu qofka ka tagayo CARE, ayaa dhammaan inta ugu harsan fasaxa sannadlaha ee aannu adeegsan lacag loogu beddeli karaa qofka. Wax fasax lacag loogu beddelaya ma jiro shaqaalaha shaqadiisa CARE sii-wata.

Fasaxyada Dadweynaha

CARE waxay caadi ahaan ay dhawrtaa ugu badnaan 15 fasaxyo rasmi ah sannad kalandaariye kasta. Kuwan waxaa ka mid ah fasaxyada qaranka oo lagu daray kuwo kastoo kale ee uu oggolaadey, Agaasimaha Dalka. Soomaaliya/ Somaliland fasaxyada rasmiga ah ee ugu badan waa saddex iyo toban (13) maalmood oo lagu daray laba maalmood oo loogu magdhowaya saacadaha yar ee la shaqeeyo bisha Soonka/Ramadhaanka.

CARE waxay soo saari doontaa liiska fasaxyada la oggol yahay inta lagu guda jirro ama ka hor Jannaayo sannad walba.

Shaqaalaha waxay keliya xaq u leeyihiin fasaxyada dadweynaha ee lagu dabakhi karo halka ay xaruntoodu tahay.

Fasaxa Waxbarashada iyo Imtixaannada

Shaqaalaha oo dhan waxay xaq u leeyihiin fasax waxbarasho oo toban (10) maalmood oo kuwa shaqada ah sannadkiiba iyadoo uu go'aanka iska leeyahay kormeeraha si ay ugu diyaar garoobaan imtixaannadooda.

Fasaxa Bukaanka

Jirrooyinka ama shilalka yaryar

Shaqaale kasta waxaa uu xaq u leeyahay ilaa 15 maalmood oo kuwa shaqada ah oo loogu talogalay jirrooyinka yaryar ee aan u baahnayn cusbitaal dhigid ama in muddo dheer laga maqnaado shaqada sannad kastoo si buuxda loo shaqeeya.

Maalmaha fasaxa bukaanka ee isku ururay ee loogu talogalay jirrooyinka yaryar ee ka badan 15 maalmood ee uu qofka sannadkii xaq u leeyahay waxaa laga goyn doonaa fasax sannadeedka, haddii si kale uu oggolaado Agaasimaha Dalka mooyaane.

Jirrooyinka ama shilalka culus

Dhammaan shaqaalaha waxay xaq u leeyihiin fasaxa bukaanka oo leh mushahar buuxa ilaa ugu badnaan lixdan (60) maalmood markaas ka-dibna fasaxa bukaanka oo leh kala-bar mushaharka ilaa ugu badnaan sodon (30) maalmood ee muddo kastoo 12 bilood ee adeeg socda.

Maalmaha fasax bukaan ee ku xiga ee gaaraya ilaa ugu badnaan 30 maalmood waxay noqon doonaan kuwo aan mushahar la qaadan haddii si kale uu oggolaado Agaasimaha Dalka

mooyaane. Fasaxa bukaanka ee sii socda ee ka baxsan maalmaha lagu sheegay halkan waxay keeni karaan hawlgabnimmo sabab u ah sababo caafimaad.

Laba iyo tobanka bilood ee joogtada ah ee adeegga waa in loo arko in ay noqdaan kuwa kalandaariye ku saleysan.

Fasaxa Loo Qaato Carruurta Xannuunsan

Marka shaqaalaha uu haysto cunug/dhallaan cusbitaalka la dhigay oo ay da'diisu ka yar tahay 10 sano eena loo baahan yahay in isaga/iyada ay la joogaan cunuga xannuunsan cusbitaalka, markaasi ka maqnaanshaha waajibaadka shaqo waxaa loo xisaabi doonaa fasaxa loo qaato carruurta xannuunsan ilaa ugu badnaan 5 maalmood sannad kasta.

Fasaxa Mushahar La'aanta ah

Fasax kasta ee uu shaqaale qaato ee ka badan midka la heli karo waxaa loola dhaqmi karaa fasax mushahar la'aan ah.

Maqnaansho kasta ee shaqada laga maqnaado in ka badan muddo laba maalmood ah ee aan ogeysiis habboon aan la siin CARE waxaa loola dhaqmi doonaa maqnaansho aan la oggolaan oo shaqada laga maqnaado iyo sida fasax aan mushahar lahayn.

Fasaxa Maqnaanshaha

Iyadoo la hoostagayo duruufo gaar ah sida sii-wadashada waxbarashada, tababar muddo gaaban ah, sababo shakshi ahaaneed ee aan la caddayn karin iwm., shaqaalaha wuxuu codsan karaa fasax maqanaansho. Agaasimaha Dalka wuxuu oggolaan karaa fasax maqanaansho oo gaaraya ugu badnaan hal sano wakhti kasta.

Inta lagu guda jirro muddadan fasaxa maqnaanshaha, shaqaalaha waa in uusan xaq u lahaan in uu helo mushaharkiisa/mushaharkeeda iyo/ama dheef kastoo kale ee caadi ahaan ay iska leeyihiin shaqaalaha CARE.

Fasaxa Umusha ama Hooyanimmada

Dhammaan shaqaalaha dumarka ah iyadoo aan la eegin dhererka muddada adeegga ama shaqada waa in ay xaq u yeeshaan fasaxa umusha oo leh mushahar buuxa oo saddex (3) bilood ee kalandaariyaha ah haddii ay ka shaqeeyaan Kenya iyo afar (4) bilood haddii ay ka shaqeeyaan Soomaaliya/Somaliland. Waxaa u sii dheer fasaxa saddexda bilood ee kalandaariyaha ah, shaqaalaha saldhigooda yahay Kenya in ay xaq u leeyihiin 2 saacadood oo nasasho naas-nuujin ah maalin kasta muddo 9 bilood ah. Shaqaalaha qaranka ee Soomaaliya/Somaliland waxay xaq u leeyihiin 1 saac oo nasasho naas-nuujin ah maalin kasta 12 bilood.

Shaqaalaha gudaha ka shaqeeya (shaqaalaha saldhigiisu yahay dal kale oo aan ahayn dalka uu u dhashey) waxaa la siin doonaa 45 maalmood oo kuwa shaqada ah oo dheeraad ku ah fasaxa umusha saddexda ama afarta bilood ee kalandaariyaha ah si loogu magdhowo 2da saacadood ee nasashada naas-nuujinta, (9ka bilood ee 2 saac ee nasashada waxay u dhigmaan 45 maalmood).

Naas-nuujinta Goobta Shaqada

CARE Soomaaliya/ Somaliland waxay bixisaa jawi goob shaqo iyo dhaqan hay'adeed oo taageeraya naas-nuujinta si loogu suurtageliyo hooyada iyo ilmaheeda in ay dareemaan dheefaha buuxa ee naas-nuujinta. CARE Soomaaliya/Somaliland waxay dhiirrigelinaysaa meelo bannaan ama qolol nuujin gaar ah, raaxo leh oo nadiif ah ee ku habboon iska lisidda ama bambeynta caanaha naaska ama naas-nuujinta, kuwaas oo leh qaboojiye iyo fool-dhaq. Shaqaalaha naas-nuujinaya waxaa loo oggol yahay in ay qaataan nasasho ay isaga lisaan caanaha naaska, iyadoo la ogsoon yahay in haweenayda ka soo tagtey ilmaheeda yar in ay u baahan tahay in ay iska listo caanaha naaska ugu yaraan saddex jeer sideedda/sagaalka-saac ee shaqada ah gudahooda maalintii. Nasashooyinkan waxaa loo tixgeliyaa in ay qayb ka yihiin shaqada maalinta caadiga ah, ee mushaharka lagu qaato shaqaalahana lagama doonayo in ay gudaan wakhtigan.

Fasaxa Aabbanimmo

Dhammaan shaqaalaha ragga ah iyadoo aan loo eegin dhererka muddada ay shaqeeyaan waxay xaq u leeyihiin toban (10) maalmood oo kuwa shaqada ah fasaxa aabbanimmo oo leh mushahar buuxa si ay u daryeelaan ilmaha hadda dhashey iyo hooyadooda.

Codsiyada loogu talogalay fasaxa aabbanimmo waa in laga faa'iideysto laba (2) toddobaad gudahooda ee marka ilmaha uu dhasho waana in ay ka mid noqdaan nuqullada:

1) Taariikhda uu bilaabanayo fasaxa ee la soo jeediyay;
2) Kaarka Aqoonsiga Qaranka/Baasaboorka xaaska codsadaha (magaca xaaska codsadaha waa in uu ka muuqdaa caymiska Caafimaadka Soomaaliya/Somaliland);
3) Foomka ogeysiiska dhalashada ee ilmaha.

Fasaxa Qofka Loo Siiyo Xaalad Gaar ah, Siiba Geerida

Shaqaalaha oo dhan waxay xaq u leeyihiin in ay qaataan fasaxa loo siiyo xaaladaha gaarka ah. Maareeyaha Waaxda waa in uu u oggolaado fasaxan keliya xaaladaha soo socda:

- Dhimashada ama jirrada halista ah ee lammaanaha ama carruurta – 10 maalmood oo kuwa shaqada ah.
- Dhimashada ama jirrada halista ah ee waalidka – 5 maalmood oo kuwa shaqada ah.
- Dhimashada qaraabo sokeeye ah - Aabbe, Hooyo, sodohda ama sodoga, walaalka ama walaasha qofka – 5 maalmood oo kuwa shaqada ah.

Fasaxa La Xiriira Guurka

- Shaqaalaha oo dhan waxay xaq u leeyihiin fasax la xiriira guurka (guurka shaqaale) oo saddex (3) maalmood oo kuwa shaqada ah.
- Fasaxan waxaa la qaataa isla marka uu shaqaaluhu guursado. Waraaq guur ayaa loo adeegsan doonaa in lagu taageero codsiga fasaxan.

Nasasho iyo Bogsasho (R&R)

Xubnaha ka tirsan shaqaalaha ee ay u soo shaqaalaysiisay CARE Soomaaliya si ay uga shaqeeyaan dalal ka fog dalalkooda hooyo waxay xaq u yeelan doonaan Nasasho iyo Bogsasho (R&R). Xaq-u-yeelashada waxaa loogu talogalay in la siiyo shaqaalaha lagu soo qasbay in ay ka shaqeeyaan

meel ka fog dalkooda hooyo fursad ay nasasho ku qaataan mararka qaar waxayna ku xiran tahay halka uu deggan yahay qoyska shaqaalaha. Haddii qoyska uu deggan yahay isla dalka u diiwaangashan in shaqaalaha uu saldhigiisu yahay, isaga/iyada xaq uma yeelan doonaan R&R. Shaqaalaha xaqa u leh R$R waxay helayaan keliya 15 maalmood oo fasax sannadle ah.

Shaqaalaha xaqa u leh R&R waxaa la siin doonaa maalin nasasho ah toddobaad kasta oo ay gudaha ku soo qaataan oo lagu daray laba maalmood oo socdaal ah. Labada maalmood ee socdaalka (hal maalin oo laga tagayo gudaha/field-ga iyo hal maalin oo dib loogu soo noqonaya gudaha/field-ga) waxaa sidoo kale loo tixgelin doonaa maalmaha shaqada, waana in shaqaalaha sidaa u arkaa. Joogitaanka ugu yar goobta gudaha/field-ga ah waxay noqon doontaa lix toddobaad iyo ugu badnaan sideed toddobaad.

Isticmaalka duulimaadka daqabadda dhaqaalaha (EC) haddii la heli karo ayaa la dhiirrigelinayaa. Diyaaradaha ay oggolaatay CARE ayaa la xusi doonaa. CARE haddii ay suurtagal tahay, waxay bixin doontaa kharashaadka socdaalka dhulka ama duulimaadka waxayna sidoo kale fududeyn doontaa socdaalka lagu tago oo looga soo noqdo Nayroobi ee loogu talogalay shaqaalaha aadaya socdaalka R & R. Isticmaalka diyaaradaha ay CARE oggolaatay iyo meelaha lagu tagayo socdaalka ayaa la xusi doonaa. Duruufaha gaarka ah ee sababta u ah sababo amni ama sababo kale ee ka baxsan kontaroolka CARE, fududeyntaasi ee socdaalka ama bixinta kharashaadka socdaalka ma dhici doonto shaqaalahana waxaa loogu wargelin doonaa sida ku habboon.

E. MAAMULKA MUSHAHARKA IYO DHEEFAHA

Mushaharada

Shaqaale kasta waxaa la siin doonaa mushahar midaysan dhammaadka bil kasta. Mushaharka midaysan waxaa ka mid ah gunno guryayn haddii loo adeegsan karo. Mushaharkani ka mid ma aha gunno kasta ama abaal kasta ee la siin karo shaqaalaha. Shaqaale kasta waa in mushaharka la siiyo maalinta shaqo ee ugu dambeysa bil kasta.

Horumarinnada Mushaharka

Shaqaalaha la xaqiijiyay waxay xaq u leeyihiin hal mushahar horumarsan sannad maaliyadeed kasta. Horumarinta waa in aysan ka badan mushaharka aasaasiga ah ee hal-bilood iyo lacagta saafiga ah ka-dib marka laga jaro wixii laga jarayo waa in aysan ka yaraan saddex-meelood meel mushaharka billaha ee aasaasiga ah. Shaqaalaha codsanaya horumarinta waa in uu dhammeystiro foomka Codsiga Mushaharka Horumarsan. Dhammaan horumarinnada mushaharka waa in dib loo bixiyo muddo saddex (3) bilood ah gudahooda.

Deynta/Ammaahda Waxbarashada Carruurta

Ammaahda waxbarashada carruurta waxaa loogu talagalay in lagu caawiyo shaqaalaha in ay bixiyaan lacagta dugsiga ee carruurtooda sharciga ah.

Horumarinnada mushaharka iyo Ammaahda Waxbarashada Carruurta waa in dib loo bixiyo saddex bilood gudahooda ama iyadoo la raacayo muddada uu oggolaadey Agaasimaha Dalka.

Qorshaha Hawlgabka

Qorshaha hawlgabka waxaa loo adeegsan karaa keliya shaqaalaha saldhigoodu yahay Nayroobi.

CARE waxay ku tabarruci doontaa 10% mushaharka aasaasiga ah ee shaqaalaha Dajarada 3A ilaa 6C iyo 15% shaqaalaha Darajada 1B ilaa 2C sanduuqa hawlgabka ee loogu talogalay dhammaan shaqaalaha hawlgabka noqon kara. Shaqaalaha waxay ku tabarruci karaan inta kale ee boqolleyda ee mushaharkooda sida tabarrucaadooda shakhsi ahaaneed ee Sanduuqa.

Gunno

Shaqaalaha saldhigoodu yahay Nayroobi

Shaqaale kasta waa in uu xaq u yeesho gunno la canshuuri karo oo le'eg 25% mushaharka aasaasiga ah ee Nayroobi waxaanna la bixin karaa Diseembar ee sannad kalandaariye kasta.

Shaqaalaha saldhigoodu yahay Soomaaliya/Somaliland

Shaqaale kasta waa in uu xaq u yeesho gunno le'eg 50% mushaharka aasaasiga ah ee bilaha oo loo bixiyo laba qaybood oo min 25% ah oo la kala bixiyo bisha Ramadhaanka iyo Ciidda.

Gunnada Ku-simaha

Jagooyinka ku-simaha/ku-meelgaarka ah guud ahaan looguma talogalin muddo ka badan hal sano. Haddii shaqaalaha uu yahay ku-sime haya jago laba bilood ama in ka badan isaga/iyada waxay helayaan "Gunnada Ku-simaha" oo dib loogu dhigo taariikhda maalinta koowaad ee bisha labaad ee hawshiisa/hawsheeda ku-simaha ah. Heerka gunnada ku-simaha waa 15% ee mushaharka aasaasiga ah ee tallaabada koowaad ee darajada ee booska shaqaalaha ku-simaha ah haya. Ku-sime kasta ee xaq u leh magdhowga waa in lagu sharciyeeyo waraaq rasmi ah oo ka socota waaxda shaqaalaha ka hor inta aan la bilaabin sii haynta ku simaha ah.

Gaadiidka

Soomaaliya/Somaliland iyada oo sabab u ah sababo amni iyo gaadiidka dadweynaha oo aan la isku halleyn karin awgood, shaqaalaha waxaa la siin karaa gaadiid kooxeed ka soo qaada ama geeya meelaha ay deggan yihiin. Qorshahan waxaa laga yaabaa in laga noqdo ama la beddelo wakhti kasta iyadoo ku xiran tixgelinnada amniga, dhaqaalaha iyo arrimo kale.

Hoy

Shaqaalaha saldhigoodu yahay gudaha ee goobaha shaqada kuwaas oo ka maqan guriyahooda u diiwaangashan waxay xaq ugu leeyihiin cunto iyo hoy guryaha martida CARE ee goobtooda shaqada ku yaalla. CARE waa in ay bixiso dhammaan kharashaadka guriga martida oo ay ku jiraan kirada, cuntada, nadiifinta qolalka iyo dayactirka.

Shaqaalaha xusha hoy iyaga u gaar ah oo ka baxsan guriga martida CARE lacag-celin looguma sameyn doono wax kharashaad ah oo la xiriira. Waxay si kastaba heli doonaan gunno cunto si ay ugu daboolaan baahidooda cunto oo ku xiran ogolaanshaha Agaasimaha Dalka.

Gunnada Maalinlaha

Shaqaalaha ugu safra meel ka baxsan xarumaha waajibaadkooda shaqo hawl rasmi ah waxaa la siin doonaa Gunno Maalinle ah iyadoo la raacayo siyaasadda gunnada maalinlaha,

http://som.ecsagateway.org/wp-content/uploads/2017/06/Perdiem-policy.pdf Tani waxay oggolaansho hore uga baahan doontaa madaxa qaybta. Heerarka gunnada maalinlaha ee xafiiska dalka gaarka ah/xafiis-hoosaadka waxay ku qoran yihiin siyaasadda gunnada maalinlaha.

Caymiska Caafimaad

Marka laga reebo ka-qeybgalka qaanuuniga ah ee Sanduuqa Caymiska Cusbitaallada Qaranka (*National Hospital Insurance Fund (NHIF*) ee Kenya, CARE Soomaaliya/Somaliland waxay siisaa qorshe caymis caafimaad dheeraad ah shaqaalaha oo dhan. Caymiska waxaa la cusboonaysiin doonaa sannadkiiba mar iyadoo ujeeddadu tahay in kor loo qaado qiimaha uu shaqaalaha leeyahay.

Qeexid

- **Dadka ku tiirsan**: Ujeeddooyinka qorshaha caafimaad awgooda, ku tiirsane waxaa loo qeexaa dadka kala ah lammaanaha ama carruurta (aad dhashey ama sharci ahaan korsanaysa) ee sharciga ah ee ay da'doodu ka yar tahay 21 sano.
- **Qaybta Qoyska**:- Qofka shaqaalaha ah, lammaanahiisa (hal keliya) iyo ilaa afar carruur ah oo sharci ah oo ay da'doodu ka yar tahay 21 sano.

Daadgureynta Xaaladaha Degdegga ah ee Caafimaadka

Daadgureynta ee xaaladaha caafimaad waxaa lagu caymiyaa gudaha caymiska caafimaadka ee shirkadda caymiska fulinaysa caymiska caafimaadka.

Caymiska Shil Kooxeedka ama Shakhsi Ahaanta & Caymiska Nolol Kooxeedka

Shaqaalaha joogtada ah waxay xaq u leeyihiin qorshaha Caymiska Shil Kooxeedka ama Shakhsi Ahaanta iyo dheefaha Caymiska nolol kooxeed haddii ay dhacdo in uu shaqaale dhinto iyadoo uu ku guda jirro shaqada CARE.

F. MAAMULKA WAXQABADKA

Dejinta Ujeeddada Waxqabadka

Shaqaalaha iyo kormeerahiisa/kormeeraheeda waxay sameyn doonaan qorshaynta waxqabadka ee sannad maaliyadeedka bisha ugu dambeysa gudaheeda ee sannad maaliyadeedka ka horreeya ama muddada tijaabada ah gudaheeda (xaaladda shaqaalaha cusub). Ujeeddada waa in la sameeyo qorshe waxqabad iyo qaab tixraac oo loogu talogalay dejinta filashooyinka waxqabadka ee sannad maaliyadeedka gudahiisa si loo hubiyo in dadaallada shaqaalaha ay ku aaddan yihiin dhanka ujeeddooyinka iyo istiraatiijiyadaha waaxda/mashruuca iyo hay'adda.

Dib-u-eegidda Waxqabadka

Dib-u-eegidda waxqabadka waa kuwo weli socda, hase-yeeshee, waa in laba jeer sannadkiiba la sameeyo dib-u-eegis rasmi ah waana in munaaqashooyinka la diiwaangeliyo, Qiimaynta Sannadka Nuskiisa ah (MYA) iyo Qiimaynta iyo Heshiiska Waxqabadka Sannadlaha (APAA).

G. HABRAACA ANSHAX-MARINTA IYO CABASHADA

Fal kastoo anshax-xumo ah ee uu ku kaco shaqaale waxaa loola dhaqmi doonaa si waafaqsan dhabbe-tusayaasha anshax-marinta ee ku xusan Buugga Siyaasadda Shaqaalaha.

H. HORUMARINTA

Tababarka iyo Awood Dhisidda

Waxaa naga go'an in aan bixinno oo aan taageerno tababarka iyo horumarinta shaqaalaha ee heerar kasta sidaa awgeed waxaan kor u qaadi karnaa aqoontaada, xirfadahaaga, dabeecadaha iyo qiyamka. Kuwani waxay muhiim u yihiin hay'adaada iyo horumarkaaga iyo ku qanacsanaanta shaqada. Anagoo ku wajahan yoolkan, ayaan waxaan bixin doonaa fursado loo siman yahay oo loogu talogalay tababarka iyo horumarinta/kobaca shaqaalaha.

Horumarinta Shaqada Shakhsiga (ICD)

Barnaamijka Horumarinta Shaqada Shakhsiga (ICD) wuxuu siinayaa shaqaalaha CARE International-Soomaaliya/Somaliland fursad ay ku qaadanayaan barnaamijyo waxbarasho kobcinaya dhabbaha Shaqadooda Shakhsi, kobaca iyo horumarka. Barnaamijyada waxay isku dayaan in ay kor-u-qaadaan oo ay sidoo kale kobciyaan xirfadaha iyo karti-xirfadeeda shaqaalaha si ay u wanaajiyaan waxqabadkooda ee jagooyinkooda shaqo ee hadda, kobaca iyo/ama kala duwanaanshaha la dareemay. Fursadaha ICD waa kuwo si firfircoon loo diyaariyo si wax looga qabto baahiyada horumarka ee shaqaalaha ee la soo saarey inta lagu guda jiray la-socoshada joogtada ah ee waxqabadka shaqaalaha, sannad-nuskiisa, iyo qiimaynta waxqabadka sannadlaha (APA), hannaanada gudaha sida hawtidhawrka/xisaabinta iyo dib u habaynta hay'adeed, barnaamijyo/mashaariic cusub iyo arrimaha qaranka iyo kuwa soo ifbaxaya.

Akadeemiyada CARE

http://careacademy.org/) Agabka barashada waxaa loogu talogalay in ay kor u qaadaan barashada shakhsi ahaaneed iyo sidoo kale in ay siiyaan shaqaalaha fursad uu ku qaato koorasyo si uu isaga raaxo ku qabo. Akadeemiyada CARE waxay bixisaa koorsooyin waxbarasho sida hoggaaminta, maamulka, maaliyadda iyo macluumaadka tiknoolajiyada (IT). Intaa waxaa dheer, in tiro buuggaag gaar ku ah CARE la diyaariyay. Shaqaalaha waxaa loo oggol yahay in ay u isticmaalaan wakhtigooda shaqada in ay ku qaataan koorsooyinka waxbarashada (e-learning) ah haddii lagala hadley maamulaha ugu dhow.

Hawl-u-xilsaaridda Aan Joogtada Ahayn (TDY)

TDY waa barnaamij shaqaalaha leh xirfadaha iyo karti-xirfadeeda majaal gaar ah fursad loogu siinayo in uu ku adeegsado qabashada hawsha Xafiisyada Dalka (CO) ee kala duwan, xarumaha dhexe ee CARE USA (xarumaha dhexe), Xafiiska (xubinka) xubinka ka ah CARE International ama xafiis-hoosaadka Care Soomaaliya/Somaliland ee aan ahayn goobta shaqada ee loo qoondeeyay.

Waxaa keliya loo oggol yahay shaqaalaha soo dhammeystay ugu yaraan hal sano qiimaynta waxqabad oo uu waxqabadkiisana yahay mid lagu qancay oo loo tixgeliyo TDY.

Barbarad ahaan ku shaqeynta

Shaqaalaha layliga ah ama tababarka qaadanaya waxaa maamula siyaasadda barbarad ahaan ku shaqeynta, tixraac http://som.ecsagateway.org/wp-content/uploads/2017/06/Internship-Policy-updated-July-2017.pdf

I. KALA-GUURKA

Iscasillaad

Shaqaalaha doonaya in uu ka tago CARE wuxuu soo gudbin doonaa waraaq iscasillaad saxiixan ama iimayl, uu ku sheegayo sababaha iscasillaada iyo taariikhda dhaqangalka.

Shaqaalaha Aan Loo Baahnayn

Shaqaalaha waxaa laga yaabaa in uu ka dhigo Agaasimaha Dalka kuwo aan loo baahnayn iyadoo sabab u ah yareynta barnaamijka, ama haddii jagada ay noqoto mid aan loo baahnayn iyadoo sabab u ah dib u habaynta qaab-dhismeedka rasmiga ah.

Joojinta Shaqada

Joojinta shaqada waxaa keeni kara sababo kala duwan sida hawl-qabadka oo liita, la'aanta dhaqaale lagu sii-wadaya barnaamijka, jagada oo meesha laga saara, dhimasho, iwm.

Haddii qofka uu tijaabo ku jiro mooyaane, ogeysiis la'aan la rukhseeyo ama si kale loogu cayimo qandaraaskooda shaqo shaqaalaha waxaa la siin doonaa ogeysiis iyadoo la raacayo qandaraaskooda shaqada.

Haddii shaqada looga joojiyo sababo la xiriira dhaqan-xumo guud, CARE waxay joojin kartaa qandaraaska iyadoon ogeysiis bixin.

Wareysiga Bixitaanka

CARE Soomaaliya/Somaliland waxay qiimaysaa jawaabcelinta shaqaalaha ee ku saabsan waayo-aragnimadooda shaqada ee CARE, Jawaabcelinta waxaa lala wadaagaa Maamulka Sare si loo suurtageliyo hay'adda in ay diirrada saarto in si habboon loo horumariyo deegaanka shaqada iyo waayo-aragnimada shaqo ee shaqaalaha CARE Soomaaliya/ Somaliland. Sidaa darteed, ka-dib marka ay hesho ogeysiiska ka tagitaanka shaqada, Waaxda Shaqaalaha waxay ku siinaysaa Xogururinta ama Su'aalaha Wareysiga Bixitanka (*eeg Lifaaqa 9.18*). Ka-qeybgalkaaga ee hannaankan waa mid iskaa ah waana lagaaga mahadnaqi doonaa.

Shahaaddada Adeegga

Shaqaalaha sabab kastoo uu uga tago CARE wuxuu xaq u yeelan doonaa shahaaddada adeegga. Shahaaddada adeegga ayaa la siin doonaa shaqaalaha u adeegga CARE muddo hal bil ah ama ka badan. CARE Soomaaliya/ Somaliland kuma qasbana in ay shaqaalaha siiso caddayn, tixraac ama shahaado la xiriirta shakhsiyadda ama waxqabadka shaqaalaha.